

# **Barnaamijka xisbiga Folkpartiet ee ugu talagallay doorashada baarlamaanka Midowga Yurub 20 maajo – 7 juunyo**

Xisbiga Folkpartiet wuxuu ahaa xisbigii ugu horeeyay ee taageersana in dalka Iswiidan uu ku biiro Midowga Yurub. Tan iyo waagaas wuxuu xisbigu u halgama wadashaqaynata dalalka Yurub. Waxaan ku kalsoonahay Yurub!

## **1. Haa, Yurub.**

Wadashaqaynta Yurub waxay dalka Iswiidan ka dhigta dal barwaaqo ah, kordhisa ammaanka addunwanaha, suurtagelisa xal u helida dhibaatooyinka soodinta an lahayn. Nabad, deegaan heer sare ah, ammaan iyo horumar-dhaqaaleed waxaa lagu heli kara iyadoo sare loo qaado wadashaqaynta Midowga Yurub.

Dhibaataada-dhaqaaleed ee haatan jirta waxay saamayn ku yeelatay Yurub oo idil. Dalka Iswiidan oo ah dal badeecadaha dibada aad ugu dhoofiyo, ayee wadashaqaynta Yurub hakashada lahayn tahay arrin ganacsiga muhim u ah. Xisbiga Folkpartiet wuxuu taageersan yahay hirgelinta lacagta [euro]. Wuxuu kale taageersan yahay kordhinta wadashaqaynta suurtagelisa helida raashinka ammanniisa heerka sare ah. Xisbigu wuxuu kalo taageersan yahay xoogga booliska midaysan [FBI] ee Yurub, taasoo suurtagelinayso la dagaalanka falalka dambiga ee culculus.

## **2. Dambifalku xuduud ma laha. Waxaan taageersan nahay xoogga booliska midaysan [FBI] ee Yurub.**

Dambifallo laamo kala duwan leh, ayaa dalal tiro badan ee ka la duwan, maalin kasta maalinta ku xigta dalka Iswiidan iyo dalal kale ee qaarada Yurub ku yaalaan isa sii taraya. Adoonsasho, ka ganacsashada maandooriyaha iyo falalka argaagixiyada ku salaysan, ayaa kamid ah dambifalada caalamiga ah, ee loogu kaco sida qaabka burcadka maffiyada. Albaab ka xirida xuduudaha xal ma noqon karo.

Waxaan leenahay fursad heer sare ah ha la siiyo wada-shaqaynta xoogga booliska, kastamadaha iyo xeerilaaliyeesha ka hawlgalada Midowga Yurub, wadashaqaynta iyo is-waydaarsashada wararka sirta ah waa lagamaarmaan, iyadoo xuduud gaar aha aan la tixgelin.

Sidaas awgeed, waxaan u baahan nahay xoogga booliska Yurub oo midaysan, oona awood ballaaran la siiyay.



### **3. Waxaan Yurub oo idil u rabna raashin ammaankiisa heer sare ah.**

Muwaatinyiinta oo idil waa in la siiya fursada go'aan gaarida, siiba ku saabsan raashinka ay cunnaan. Raashinka wuxuu soo mara waddo dheer, laga soo bilaabo beeraha ilaa dukamaha an ka soo iibsanno.

Baakooyinka waa in hab cad ah loogu soo qora waxa raashinka baakooyinka ku jira laga sameeyay. Waa codsi aan mugdi ku jirin. Waa in lays waafjiyaa waxa baakada ku qoran iyo waxa ku jira. Sidaas u ma dhib badna in arrintaas la fuliyo.

Sidaas awgeed, kormeerida raashinka waa in Midowga Yurub uu sare u qaada.

### **4. Waxaan taageersan nahay hirgelinta lacagta [euro].**

Xisbiga Folkpartiet wuxuu aaminsan yahay adduunwayne daacad ah iyo korniinka ganacsiga lays waydaarsado iyo wadashaqaynta ammuuraha dhaqaalaha. Lacagta [euro] waa qodob muhim u ah wadashaqaynta Midowga Yurub. Muhimadaas oo lagu muujiyay dhacdoonkii xilligii dayrta 2008 ku saabsana dhibaataada dhaqaalaha. Dalalka Midowga Yurub waxaa u suurtagashay xasilinta suuqa adduunwaynaha iyo ka hortagga qiyaasida iyo dhibaatooyinka lacagta.

Faa'iidada muwaatinka uu ka helo karo hirgelinta [euro] waxaa kamid ah korsaarka daynta guryaha oo xasilan, iyo sarifka lacagta oo aan isbedel lahayn markii qofku u socdaal galo ama badeecad dibada ka soo iibsado. Faa'iidada shirkadaha ay ka heli karaan hirgelinta [euro] waxay noqon karta, suuq ballaaran iyo maalgelin halis- teeda hooseeyso. Lacagta wajirta loo adeegsado waxay kalo suurtagelinaysa in hab fudud lays barbardhigo sicirada. Waxaa sidaas sare u kacaayo tartanka ganacsiga iyo hoos u dhaca sicirada.

Sidaas awgeed, waa in dalka Iswiidan laga hirgeliya ku isticmaalka lacagta [euron].

### **5. Neefta nooluhu neefsado xudduud malaha. Tamarta niyukliyarka aan xajisanno.**

Qodobka siyaasadda cimilada ugu muhimsan waa in lagu salayaa wadashaqaynta caalamiga iyo hogaamin dhaqaale ku salaysan. Dalka sii daya gaaska dhirta [växt-husgaser] waa in u bixiyaa qiimo aad u badan. Midowga Yurub waa in adduun- waynaha ka dhadhaaciya in, horumar-dhaqaaleed uu suurtagal noqon karo iyadoo isla markaas dhaqsi hoos loo dhigo sii daynta gaaska dhirta.

Tamarta niyukliyarka waa tamar nadiif ah, oo aan sii daynayn gaaska dhirta. Tamarta la'aanteed, suurtagal marna ma noqon karto in ujeedada hadafka cimilada la gaaro. Sidaas awgeed, dalka Iswiidan iyo dalalka xubnaha Midowga Yurub ka ah,

waxay u baahan yihiin in ay dhisaan tamarta niyukliyarka oo cusub oona casri ah, laguna beddelo kuwa hore.

Xisbiga Folkpartiet hab daacadnimo ku salaysan ayuu ugu walwalsan yahay halista cimilada. Sidaas awgeed, tamarta niyukliyarka aan xajisanno.



[www.folkpartiet.se](http://www.folkpartiet.se) [mobil.folkpartiet.se](http://mobil.folkpartiet.se)

[info@liberal.se](mailto:info@liberal.se)

020-53 53 53